





# Qaabkaa Galmada iyo Su'aalaha Aqoonsiga Jinsiga:

## Xogta Bukaannada



**Waad ku mahadsantahay waqtiga aad siisay dhameystirka su'aalahan.** Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah, waxaan kugu dhiiri galineynaa inaad la hadasho adeeg bixiyahaaga.






Mashruucan waxaa taageeray Maamulka Ilaha iyo Adeegyada Caafimaadka (HRSA) ee Mareykanka. Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (HHS) ee hoos timaada heshiiska iskaashiga lambarkiisu yahay U30CS22742, Tababarka iyo Caawinta Farsamada Heshiisyada Iskaashatada (NCAs) ee $625,000.00 oo leh 0% wadarta mashruuca NCA lagu maal galiyay ilo aan federaal aheyn. Macluumaadkan ama nuxurka iyo gunaanudka waa kuwa qoraaga waana in aan loo fasirin mowqifka rasmiga ah ama xeerka, mana aha iney taageero ku gabagabeyso HRSA, HSS, ama Mareykanka. Dowlad.

NATIONAL LGBT HEALTH EDUCATION CENTER
A PROGRAM OF THE FENWAY INSTITUTE
Xarunta Waxbarashada Caafimaadka+ LGBTQIA Qaranka
Barnaamijka Fenway Institute
TFIE-47

Waxaan ku weydiineynaa wax ku saabsan qaabkaaga galmo iyo aqoonsiga jinsiga si aad u bixiso daryeel bukaan jiif oo dheeraad ah. Akhri gudaha si aad u barato micnaha su'aalaha, iyo sida xogta loo isticmaali doono si loo horumariyo dhammaan daryeelka caafimaadka.

## Q: MAXAA LA II WEYDINAYAA HANUUNINTEYDA GALMO IYO AQOONSIGA JINSIGA?

Barashada ku saabsan qaabka galmada iyo aqoonsiga jinsiga ee bukaankeena waxey naga caawisaa inaan si fiican u fahanno dadka aan u adeegno. Waxey kaloo noo ogolaataa inaan bixino daryeel dhaqan ahaan ka jawaabaya isla markaana diirada saaraya baahiyaha gaarka ah ee bukaanka.

## Q: WAA MAXAY AQOONSIGA JINSIGA?

Aqoonsiga jinsiga waa dareenka gudaha qofka ee ahaanshaha gabar/haweeney/dhaddig, wiil/nin/lab, wax kale, ama jinsi la'aan.

Ereyga "sinji beddelka" wuxuu qeexayaa dadka aqoonsiga jinsigooda iyo jinsiga la siiyay xiliga dhalashada uusan matalin iyadoo loo eegayo filashooyinka dhaqanka.

- **Nin sinjigiisa u beddelay haweeyney/dhaddig** waxey qeexeysaa qof la siiyay lab xiliga dhalashada kaasoo leh jinsi aqoonsi dhaddig.
- **Naag sinjigeeda nin u beddeshay/lab** waxey qeexeysaa qof lasiiyay dhaddig xiliga dhalashada kaasoo leh jinsi aqoonsi lab.

Aqoonsiga jinsiga dheeraadka ah waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn:

- **Jinsiga is badala:** oo qeexaya qof jinsigiisu aan meel ku ekeyn.
- **Jinsiga queer/Jinsi laawe:** waxey qeexaan dadka aqoonsiga jinsigoodu yahay wax ka baxsan dhaqanka jinsiga caadiga ah ee ah gabar/haweeney/dhaddig ama wiil/nin/lab.

## Q: WAA MAXAY QAABKA GALMADA?

Qaabkaa galmada waa sida dadku ay u qeexaan soo jiidashada shucuureed iyo jireed ee dadka kale.

- **Haterosexual (toosan)** waxey qeexeysaa haweeney si caadi ah usoo jiidata nin iyo nin si caadi ah usoo jiita haweeney.
- **Khaniis** waxa uu qeexayaa dadka sida caadiga ah usoo jiitaan isla jinsiga ayaga oo kale. Ereyga 'gay' wuxuu inta badan tilmaamayaa nimanka ay soo jiitaan nimanka.
- **Khaniisad** waxey tilmaameysaa haweeney sida caadiga ah soo jiidata haweenka kale.
- **Labogalmood** waxa ay qeexeysaa dadka niyad iyo jir ahaanba soo jiita dumarka/dhaddiga iyo ragga/labka Dadka qaar waxay ku qeexaan laba-galmoodnimada iney tahay soo jiidashada jinsiga oo dhan.

Dadka qaar waxey isticmaalaan erayo kale, sida **queer**, si ay u qeexaan qaaabkooda galmo.

## Q: KA WARAN HADDII AANAN GARANEYN SIDA LOO JAWAABO?

Waxaad dooran kartaa **"Ma Garanayo"** haddii aadan hubin, ama waxaad la hadli kartaa adeeg bixiyahaaga.

## Q: KA WARAN HADDII MID KAMID AH QEYBAHA AANEY I QEEXEYN?

Waxaa jira qaab galmo oo badan iyo aqoonsiyo jinsi. Nasiib darro, suurta gall ma aha in dhammaantood la liis gareeyo. Haddii qaabkaaga galmo ama aqoonsiga jinsiga aan lagu darin liiska la bixiyay, waxaad dooran kartaa qeyb dheeraad ah ama, haddii boos la bixiyo, waxaad ku qori kartaa ereyada aad u isticmaasho inaad isku qeexdo.

## Q: KA WARAN HADDII AANAN RABIN INAAN LA WADAAGO XOGTAN?

Waxaad dooran kartaa **"Dooro inaadan shaacin."** Hadhoow, adeeg bixiyahaaga wuxuu ku weydiin karaa su'aalahan si gaar ah, oo adiguna su'aalo ayaad weydiin kartaa bixiyahaaga. Waligaa uma baahnid inaad ka jawaabto haddii aadan rabin.

## Q: YAA ARKI DOONA MACLUUMAADKA?

Adeeg bixiyeyaasha daryeelka caafimaadkaaga ayaa arki doona macluumaadkan, waxaana suurtagal ah iney qeyb ka noqoto diiwaanka caafimaadka elektaroonigga ah. Haddii xubin ka mid ah shaqaalaha uu galo xogta diiwaanka caafimaadkaaga, qofkaas ayaa sidoo kale arki doona jawaabahaaga. Haddii aad walaac qabto, la hadal bixiyahaaga.

## Q: SIDEE MACLUUMAADKAYGA LOO ILAALIN DOONAA?

Hanuunintaada galmo iyo aqoonsiga jinsiga waa qarsoodi waxaana ilaaliya qaanuunka, sida dhammaan macluumaadkaaga caafimaad ee kale. Haddii aad ka yar tahay 18 jir, waalidkaa/masuulka ayaa suurtagal ah iney helaan xogtan. La hadal bixiyahaaga haddii aad qabto wax walaac ah.

## Q: SIDEE LOO ISTICMAALAYAA MACLUUMAADKAN?

Adeeg bixiyahaaga ayaa u isticmaali doona macluumaadkan si ay si fiican u fahmaan oo ay u dabool-aan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka. Intaa waxaa dheer, uruurinta xogtan bukaannada oo dhan waxey u oggolaaneysaa xarumaha caafimaadka iney fiiriyaan haddii ay jiraan daldaloolo xaga daryeelka ama adeegyada ee ka jira dadka kala duwan.

## Q: MAXEY XARUMAHA CAAFIMAADKA U WEYDIIYAAN WAX KU SAABSAN MAGAC U YAALKA?

**Magac u yaal** waa erayada ay dadku adeegsadaan marka ay adiga ku tilmaamayaan, laakiin iyada oo aan la isticmaalin magacaaga. Tusaalooyinka magac u yaalka waa iyada/iyada/keeda, isaga/isaga/kiisa, iyo iyaga/iyaga/kooda.

Weydiinta wax ku saabsan magac u yaalka waxey ka caawisaa shaqaalaha iney si sax ah u txiraacanbukaannada. Hadii kale, shaqaalaha waxey u baahan yihiin iney sameeyaan malo, taas oo keeni karta xaalado yaxyax iyo ixtiraam darro.